


Macluumaadka Adeegyada Ganacsiga

Ka Socota Xafiiska Xoghayaha Gobolka Minnesota



Tallaabooyin iyo Xiriiro Dheeraadka ah Hadda Marka aad dhammaystirtay Xarayntaada/diiwaaangelinta

Waxaa laga yaabaa in ay jiraan tallaabooyin dheeri ah oo loo baahanyahay marka diiwaangelintaada laga xareeyo xafiiskeena. Fadlan akhri macluumaadka hoos ku qoran. Haddii aad wax su'aalo ah qabto, fadlan kala soo xiriir xafiiskeena 651-296-2803, khadka bilaashka ah: 1-877-551-6767, Minnesota Relay 711 ama email ahaan: business.services@state.mn.us, ama soo booqo websaydkeena www.sos.state.mn.us

Magaca aad qaadatayo: Haddii aad u xaraysay Shahaadada Magaca aad Qaadatay ama Shahaadada wax ka beddelka Magaca aad Qaadatay, waa inaad ku soo daabacdo "wargeys sharci ah" oo ku yaalla degmada uu ganacsigu ku yaallo. Waxedaad liiska wargeysyadaas ka heli kartaa websaydkeenna qaybta hoos timaada Business & Liens, Start a Business, Legal Newspapers and List of Legal Newspapers. Waa inaad ku soo daabacdo qoraalka Shahaadada ama Shahaadada wax laga beddelay laba daabacadood oo isku xigta (laba maalmood oo isku xigta haddii uu wargeysku yahay maalinle; laba toddobaad oo isku xigta haddii wargeysku yahay toddobaadle). Diiwaangelinta Magacaaga aad qaadatay (Assumed Name) wuxuu noqon karaa mid aan ansax ahayn haddii aadan dhamaystirin tallaabadan. La xiriir wargeyska si aad u hesho tilmaamo dheeraad ah oo ku saabsan sida tan loo soo daabaco. Daabacaada kadib, wargeysku waxa uu ku siin doonaa warqad caddayn ah oo daabacaada ah oo ay tahay inaad ku haysato diiwaannadaada ganaci.

Intaa waxa dheer, waa in aad xarayso Cusboonaysiin Sannadeedka hal mar sanadkii, laga bilaabo sanadka ku xiga sanadkii aad asalka ahaan ka xaraysay Xoghayaha Gobolka. Magaca aad qaadateen wuu dhacayaa haddii aad ku guuldaraysataan inaad soo xaraysaan Cusbooneysiinta Sannadlaha ah. Haddii Magaca aad qaadateen uu dhacay, waxaad dib u soo celin kartaa (haddii magaca weli la heli karo) adiga oo soo buuxinaya cusboonaysiinta sanadka hadda lagu jiro oo bixinaya khidmada loo baahanyahay.

Shirkad, Co-op, LLC, LLP ama LP: Haddii aad ka xaraysay Minnesota, Ganacsii Shisheeye, ama Shirkad aan faa'iido doon ahayn, ama Iskaashato, Shirkad Mas'uuliyad Xaddidan, Iskaashato, Shuraako, ama Shuraako Xaddidan, waa in aad xarayso Cusboonaysiin Sannadeedka hal mar sanadkii, laga bilaabo sanadka ku xiga sanadkii aad asalka ahaan ka xaraysay Xoghayaha Gobolka. Hay'adaadu waxay noqon doontaa mid "si sharci ahaan la baabi'iyey" (aan loo aqoonsanayn inay ka jirto Minnesota) haddii aad ku guuldaraysato inaad xarayso Cusbooneysiin Sannadeedkaaga. Haddii hay'addaada sharci ahaan loo baabi'iyey, dib ayaad u soo ceshan karaa (haddii magaca weli la heli karo) adiga oo xaraynaya cusboonaysiinta sanadka hadda lagu jiro oo bixinaya khidmada loo baahanyahay.

Marka lagu daro xaraynta Cusboonaysiinta Sannadlaha ah, Shirkadaha Nacfiga Dadweynaha waxaa looga baahanyahay inay xareeyaan Warbixinta Nacfiga Sannadlaha ah sannad kasta kahor Abril 1deeda, oo daboolaysa muddada laba iyo tobanka bilood ah ee dhammaanaysa Diisambar 31-keeda ee sannadkii hore oo ay ku bixiyaan kharash \$35 ah Xoghayaha Gobolka.

Haysashada Magaca (Name Reservation): Haddii aad xaraysay haysashada Magaca, waxay shaqaynaysaa laba iyo tobant bilood laga bilaabo taariikhda xaraynta. Waa aad dib u cusboonaysiin kartaa sannad kasta laba iyo tobant bilood oo dheeraad ah adiga oo soo buuxinaya foom kale oo Haysashada Magaca ah oo bixinaya kharashka loo baahanyahay kahor intaan la gaarin taariikhda uu dhacayo. Haddii haysashada Magacuu dhacday, waxaad xaray kartaa Haysashada Magaca oo cusub (haddii magaca weli la heli karo) adiga oo xaraynaya foomka Haysashada Magaca oo bixinaya khidmada loo baahanyahay.

Astaanta Ganacsiga: Haddii aad xaraysay diiwaangelinta Astaanta ganacsiga, waxay shaqaynaysaa tobant sano laga bilaabo taariikhda aad xaraysay. Waxedaad dib u cusboonaysiin kartaa tobant sano oo kale adiga oo soo buuxinaya foomka cusboonaysiinta oo bixinaya kharashka loo baahan yahay inta lagu jiro lixda bilood ee ka horeeya taariikhda uu dhacayo.

Dhul beereedka: Hay'adaha leh, kiraysanaya, ama dan dhaqaale ku qaba dhul beereed ama dhul awood u leh in la beero waa inay iska diwaangeliyan Waaxda Beeraha.

Adeegyada khadka internetka ayaa laga heli karaa Xafiiska Xoghayaha Gobolka. Ka dalbo shahaadooyinka ganacsiga, nuqullada ganacsiga, ama ku xaree diiwaangelinta ganacsiga khad internetka adiga oo isticmaalaya lacag ku bixinta kaarka bangiga. Soo booqo websaydkeena: www.sos.state.mn.us



Xafiiska Xoghayaha Gobolku ma bixiyo talo sharci ama ganacsi. Macluumaadkan waxaa loo bixoyey si ay ugu howl fududayso macaamiisheena. Xafiisku ma dammaanad qaadayo in adeegyadan ay bixiyaan hay'adaha liiska ku jiraa. Boggan kuma qorna dhammaan shuruudaha looga baahanyahay ganacsiga dhowaan la diiwaangaliyey. Fadlan kala tasho lataliyahaaga sharciga ama ganacsiga si aad u hesho macluumaad iyo talo ku saabsan xaaladaada.

Xafiiska Xoghayaha Gobolka Minnesota | Xarunta Adeegyada Ganacsiga | 332 Minnesota Street, Suite N201 | Saint Paul, MN 55101 1-877-551-6767 ama 651-296-2803 | Adeega Relay Service 711 | business.services@state.mn.us | www.sos.state.mn.us

LAMBARADA AQOONSIGA CANSHUURTA, SHATI SIINTA & ILAHA GANACSI EE KALE

HAY'ADDA CANSHUURAHA DALKA (INTERNAL REVENUE SERVICE)

Foomka Aqoonsiga Looshaqeeyaha: 1-800-829-3676
Telefanka Kaalmada Ganacsiyada: 1-800-829-4933
Telefanka Kaalmada Hay'adaha Cashuur dhaafka ah: 1-877-829-5500
Websayd: www.irs.gov

WAAXDA DAKHLIGA (DEPARTMENT OF REVENUE)

Macluumaad guud: 651-296-6181
Macluumaadka Aqoonsiga Canshuurta Gobolka (State Tax ID): 651-282-5225 ama 1-800-657-3605
Websayd: www.revenue.state.mn.us

WAAXDA SHAQAALAH & SHAQADA (DEPARTMENT OF LABOR & INDUSTRY)

Macluumaadka Guud ee Magdhawga
Shaqaalah : 651-284-5000 Macluumaadka
Shatiga Qandaraaslah: 651-284-5034
Websayd: www.doli.state.mn.us

WAAXDA GANACSIGA(DEPARTMENT OF COMMERCE)

Shati siinta Bangiyada, Ururada Daynta, Caymiska, Hantida ma guurtada ah, raasumaalka, iwm.
Taleefan: 651-539-1500 Websayd: www.commerce.state.mn.us

WAAXDA SHAQADA & HORUMARINTA DHAQAALAH (DEED) (DEPARTMENT OF EMPLOYMENT & ECONOMIC DEVELOPMENT (DEED))

Barnaamijka Caymiska Shaqala'aanta ee MN & Macluumaadka Caymiska Shaqa la'aanta ee Akoonka Loo-shaqeeyaha : 651-296-3644, Websayd: www.uimn.org

GARGAARKA GANACSIYADA YAR YAR (SMALL BUSINESS ASSISTANCE)

Wuxuu daabacaa "A Guide to Starting a Business in MN" ("Hagaha Bilaabida Ganacsiga MN")
Taleefanka: 651-556-8425 ama 1-800-310-8323
Websayd: www.mnsbao.com

AFRICAN DEVELOPMENT CENTER OF MINNESOTA - Hay'ad gargaarka bulshada. Taleefan: 612-333-4772 Websayd: www.adcminnesota.org

LATINO ECONOMIC DEVELOPMENT CENTER - Hay'ad gargaarka bulshada. Taleefan: 612-724-5332 E-mail: info@ledc-mn.org; Websayd: www.ledc-mn.org

LEGAL CORPS - Qareenno tabaruc u ah ganacsiyada yaryar iyo kuwa aan faa'iido doonka ahayn. Taleefan: 1-888-454-5267 ama 612-206-0780 Websayd: www.legalcorps.org

METROPOLITAN ECONOMIC DEVELOPMENT ASSOCIATION (MEDA) - Waxay ka caawisaan ganacsatada midabka leh inay guulaystaan. Taleefan: 612-332-6332; Email: info@meda.net; Websayd: www.medainfo.org

MINNESOTA ATTORNEY GENERAL - Macluumaadka hayadaha aan faa'iido doonka ahayn iyo samafalka. Taleefan: 651-296-3353 ama 1-800-657-3787 Websayd: www.ag.state.mn.us.

MINNESOTA COUNCIL OF NONPROFITS - Tababarro iyo buug gacmeedka sida loo bilaabo hay'ad aan faa'iido doon ahayn Taleefan: 651-642-1904; Websayd: www.minnesotanonprofits.org.

SHARCI DEJINTA GOBOLKA MINNESOTA - Qaunuunka, sharciyada iyo xeerarka. Websayd: www.leg.state.mn.us

PROPEL NONPROFITS - Kafaala qaadaha maaliyadeed ee hay'adaha cusub. Taleefan: 612-249-6700; Websayd: www.propelnonprofits.org

SERVICE CORPS OF RETIRED EXECUTIVES (SCORE) - La taliyayaasha ganacsiyada yaryar ee Maraykanka oo bixiya talo ganaci oo bilaash ah. Taleefan: 952-938-4570; Websayd: www.score.org

GARGAARKA GANACSIGA YARYAR (SMALL BUSINESS ASSISTANCE) - Waaxda Shaqada iyo Horumarinta Dhaqaalah ee Minnesota (DEED), oo daabacda "Hagaha ka Bilaabidda Ganacsiga Minnesota" oo hayaan diiwaanka macluumaadka shatiga iyo ogolaanshaha. Taleefan: 651-556-8425 ama 1-800-310-8323; Websayd: www.mnsbao.com

XIFIISKA XUQUUQDA LAHAANSHA EE MARAYKANKA (UNITED STATES COPYRIGHT OFFICE) - Taleefan: 202-707-3000; Websayd: www.copyright.gov UNITED STATES PATENTS & TRADEMARKS (XUQUUQDA LAHAANSHA & CALAAMADAHA GANACSIGA EE MARAYKANKA) - Taleefan: 1-800-786-9199; Websayd: www.uspto.gov ADEEGGA BOOSTADA EE MARAYKANKA – Taleefan: 1-800-275-8777; Websayd: www.usps.com

MAAMULKA GANACSIGA YARYAR EE MARAYKANKA (UNITED STATES SMALL BUSINESS ADMINISTRATION) - Adeegyada iyo barnaamijyada ganacsiga yar yar. Taleefan: 1-800-827-5722 Websayd: www.sba.gov

VETERANS RESOURCE: Waaxda Shaqada iyo Horumarinta Dhaqaalah ee Minnesota Websayd: <http://www.positivelyminnesota.com/JobSeekers/Veterans/index.aspx>

WOMEN VENTURE - Hay'ada horumarinta dhaqaalah ee aan faa'iido doon ahayn oo caawisa haweenka si ay u gaaraan isku filnaansho dhaqaale iyada oo loo marayo abuurista iyo kobcinta ganacsyo faa'iido leh oo waara. Taleefanka: 612-224-9540; Websayd: www.womenventure.org